

22-kii bishii Maarso, 2020, dowladda Jarmalka ayaa go'aansatay tallaabooyinka soo socda:
Bulshada waa inay si adag u raacaan sharciyada:

Isku imaanshaha in ka badan laba qofood gabi ahaan waa la mamnuucay. Waxaan dadkaas ku jirin qoysaska iyo kuwa hal guri ku wada-nool.

Taabashada dadka aan is-aqoonin waa in illaa heerka ugu hooseeya la yareeyaa.

Goobaha bulshada waa in masaafo 1.50-mitir ah ay isku jirsadaan dadka.

Bilayska iyo masuuliyiinta hab-dhowrka ayaa la socon doona ku xad-gudubka xakameynta xiriirka, waana laysku ganaaxi doonaa.

Tallaabooyinka nadaafadeed ee Shirkadaha ee Shaqaalaha iyo Martida waa in la ilaaliyaa.

Goobaha cuntada bisil waa inay xirnaadaan. Dalabaadka guryaha laysugu geeyo ama guryaha in lagu cuno loo qaato waa la oggolyahay.

Shirkadaha adeega ee jooga qeybta daryeelka shaqsiyeed (tusaale ahaan timo-jareyaasha iyo goobaha is-qurxinta) waa in la xidhaa. Daaweynta caafimaadka waa loo oggol-yahay.